**<u>Soo Koobidda Maamulka</u>**

Intii lagu jiray kulankii sharci dejinta ee 2019-kii, sharci dejinta ayaa ansixisy iyada oo Guddoomiyaha Gobolkuna saxiixday Sharciga Senate-ka 577. Qaybta 9 ee sharcigu waxay uga baahan tahay Guddiga Caddaalada Dembiyadda ee Oregon (CJC) in ay dib u eegaan dhammaan xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn si loo soo sheego natiijada sanad walba Luulyo 1. Tani waa warbixin sanadeedkii afaraad iyo waxayna ka hadlaysaa xogta ku saabsan dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn ee ka dhacay Oregon intii lagu jiray taariikh sanadeedkii 2020, 2021 iyo 2022. Qof kasta oo daneynaya in uu eego warbixinta oo dhan wuxuu sidaasi sameyn karaa isaga oo nuqul ka codsanaya Guddiga Caddaalada Dembiyadda oo laga helo 503-378-4830 ama iyada oo la galayo meeshan la sii gelayo:
[https://www.oregon.gov/cjc/CJC%20Document%20Library/SB577ReportJuly2023.pdf.](https://www.oregon.gov/cjc/CJC%20Document%20Library/SB577ReportJuly2023.pdf)
Weydiimaha guud ee ku saabsan warbixintani waa in lagu hagaajiyo Guddiga Caddaalada Dembiyadda oo laga helo 503-378-4830. Su'aalaha gaarka ah oo ku saabsan waxa ay ka kooban tahay warbixintani waxaa lagu hagaajin karaa Ken Sanchagrin, Agaasimaha Guddiga Caddaalada Dembiyadda, oo laga helo 971-719-6000 ama ken.sanchagrin@cjc.oregon.gov.

Warbixinta buuxdaa waxay muujinaysaa xog kooban iyo falanqeynta dhabta ah ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn oo laga helay ilo xogeed oo dhowr ah oo uu ku jiro Khadka Ka Jawaabida Eexda (oo loo yaqaan *BRH* ama *Hotline* warbixintani dhexdeeda) oo ay aasaaastay Waaxda Caddaalada ee Oregon (DOJ) waxaa ka go'an caawinta dhibanayaasha, markhaatiyaasha, iyo soo sheegayaasha kale ee dembiyada eexda iyo dhacdooyinka eexda ee aan dembiga ahayn. Intaasi waxaa dheer, in warbixintu muujinayso xog ku saabsan dembiyada eexda la xiriira oo laga soo qaatay Nidaamka Warbixinta Ku saleysan Dhacdada Qaranka (NIBRS) ee Oregon oo ku yaala Booliska Gobolka Oregon (OSP) gudahiisa, xogta ku saabsan dacwad isku soo oogista dembiyada eexda oo ka socota 34 ah xafiisyada qareenada degmada,,[1] xogta xiritaanka dadka 'arrest' oo ka socota Nidaamka Xogta ee Fulinta Sharciga (LEDS) ee qaranka, xogta maxkamadda ee dembiyada eexda oo ka socota nidaamka xogta Odyssey ee Oregon, xogta isku xumida iyo xukunka ee dembiyada eexda oo ka socota Waaxda Asluubta ee Oregon (DOC). Natiijooyinka [Xogta (Hotline) ee Waaxda Caddaalada]() waxay tilmaamayaan warbixinta dembiyada eexda iyo dhacdada eexda, [2] oo si wadajir ah loogu yaqaano warbixinta eexda-ku dhisan "bias-motivated reports."

<u>Natiijooyinka Muhiimka ah</u>

- Warbixinta eexda-ku dhisan ee loo soo gudbiyay Khadka tooska ah ayaa korodhay 60% iyada oo ahayd 910 sanadkii 2020 oo noqotay 1,457 sanadkii 2021, iyo in dheeraad ah oo ah boqolkiiba 74% oo noqotay 2,534 sanadkii 2022. Jinsiyada (n = 1,298; 51%), gaar ahaan ka dhanka ah dadka Madow/Maraykanka Madow ah (n = 610; 24%), ayaa weli ah qaybta ugu weyn ee warbixinta eexda-ku dhisan ee sanadkii 2022 (fiiri Shaxanka A9 ee [Lifaaqa A]()).
  - Warbixinta Khadka tooska ah ee eexda-ku dhisan ee la xiriirta dalka laga soo jeedo, iyo kuwa ka dhanka ah dadka Hisbaaniga, iyo dadka yuhuuda 'antisemitic' ayaa korodhay laga soo bilaabo sanadkii 2020 ilaa 2022 . Warbixinta eexda-ku dhisan ayaa korodhay iyada oo ahayd 166 (boqolkiiba 18% oo ah warbixinta eexda-ku dhisan) sanadkii 2020, oo noqotay 283 (19%) sanadkii 2021, iyo iyada oo noqotay 640 (25%) sanadkii 2022, iyada oo warbixinta eexda-ku dhisan ee ka dhanka ah dadka Hisbaanigu ay korodhay iyada oo ahayd 111 (12%) sanadkii 2020, oo noqotay 129 (9%) sanadkii 2021, iyo iyada oo noqotay 379 (15%) sanadkii 2022. Warbixinta

[1] Xog lagama helin 2 degaan: Gilliam iyo Umatilla.
[2] Xogta Khadka tooska ah 'Hotline' ee lagaga hadlay warbixintani ayaa diiradda saareysa warbixinta eexda-ku dhisan ee <u>bilawga ah</u>, dhacdooyinka eexda iyo dembiyada eexda. Shuruudaha seexda lama buuxin, warbixinta soo noqnoqotay iyo/ama warbixinta la go'aamin kari waayay waxaa lagaga hadlay Shaxanada 1-2, Tirooyinka 1-2, iyo Shaxanada A1-A6 ee Lifaaqa A waxaana laguna soo bandhigay [Goobta Xogta 'Dashboard']() ee Dembiyada Eexda.

eexda-ku dhisan ee ka dhanka ah diinta ayaa korodhay iyada oo ahayd 66 (boqolkiiba 7% oo ah warbixinta eexda-ku dhisan) sanadkii 2020, oo noqotay 208 (14%) sanadkii 2021, iyo iyada oo noqotay 251 (10%) sanadkii 2022, kuwaasi oo intooda badan ay ku dhisan yihiin eexda ka dhanka ah dadka Yuhuuda.
  - Warbixinta eexda-ku dhisan ee is aqoonsiga jinsi ahaaneed ayaa korodhay iyada oo ahayd 51 (boqolkiiba 6% oo ah warbixinta eexda-ku dhisan) sanadkii 2020, oo noqotay 149 (10%) sanadkii 2021, iyo iyada oo noqotay 377 (15%) sanadkii 2022. Warbixinta eexda-ku dhisan ee dookha galmo ayaa sidoo kale korodhay iyada oo ahayd 96 (boqolkiiba 11% oo ah warbixinta eexda-ku dhisan) sanadkii 2020, oo noqotay 258 (18%) sanadkii 2021, iyo iyada oo noqotay 509 (20%) sanadkii 2022.
- Warbixinta Khadka tooska ah ee eexda-ku dhisan ee ka dhanka ah dadka Aasiyaanka ayaan ahayn kuwo u sarreeya sidii sanadkii 2021 (n = 192; boqolkiiba 13% oo ah warbixinta eexda-ku dhisan) intii lagu jiray cudurkii baahsanaa ee COVID-19, laakiin uu weli jiro walaac laga qabo sanadkii 2022 (n = 148; 6%) (fiiri Shaxanka A9 ee Lifaaqa A).
- Warbixinta Khadka tooska ah ee eexda-ku dhisan ee ka dhacday dugsiyada K-12 ayaa korodhay iyada oo ahayd 36 (boqolkiiba 4% oo ah warbixinta eexda-ku dhisan) sanadkii 2020, oo noqotay 150 (10%) sanadkii 2021, iyo mar labaad oo ay noqotay 408 (16%) sanadkii 2022 (fiiri Shaxanka A20 ee Lifaaqa A). Xidhiidhka dhibbanaha iyo eedaysanaha isku dugsiga ah ayaa gaaray 4 sanadkii 2020, 59 sanadkii 2021 iyo 240 sanadkii 2022 (fiiri Shaxanka A27 ee Lifaaqa A). Warbixinta eexda-ku dhisan oo badan oo ka jira dugsiyada ma uusan qaban Khadka tooska ah iyada oo sababtu tahay hababka wax loo soo sheego ee beddelka ah ee dugsiga iyada oo warbixintani ay ka turjumayso oo kaliya qayb ka mid ah eexda jirta ee ka dhacaysa goobaha waxbarashada ee Oregon.
- Xogta Khadka tooska ah iyo NIBRS ayay labaduba muujinayaan kor u kac ku yimid falalka eexda-ku dhisan ee ay sameeyeen dadka uu yaqaan ama waxoogaa uu yaqaano qofka dhibbanaha: Boqolkiiba 44% oo ah warbixinta Khadka tooska ah ee eexda-ku dhisan ee sanadkii 2022 iyo boqolkiiba 20% oo ah dembiyada eexda oo loo soo sheegay NIBRS ayay ku lug yeeshaan eedaysanayaal uu yaqaano ama qayb ahaan uu yaqaano qofka dhibbanaha ah.
- Boqolkiiba 32% oo ah eedaysanayaasha dembiga eexda ee 2022 ayaa lagu xukumay dembi kasta: Boqolkiiba 14% ka mid ah ayaa lagu xukumay eedaymaha eexda iyada oo boqolkiiba 17% lagu xukumay eedaymo aan eex ahayn (fiiri Shaxanka 28 ee Eedaymaha (Odyssey)). Heerarka isku xukunka ayaa la filayaa in ay kordhaan iyada oo kiisas badan la dhammeystiray.
- Eedaysaneyaal dhowr ah ayaa lagu xukumay xabsi oo ah xukunka eedaymaha eexda. Inta badan waxaa lagu xukumay in ay galaan muddo tijaabin ah 'probation' oo leh shuruudaha muddada tijaabinta ah 'probation' oo guud, oo lagu amray in aanay la xiriirin dhibanayaasha, loona gudbiyay caafimaadka dhimirka iyo/ama qiimeynta isticmaalka daroogada/mukhaadaraadka iyo daaweyn (fiiri Natiijooyinka Kiiska ee la xiriira wada hadalka).

Talooyinka CJC

1. Khadka tooska ah waa in uu sii wadaa ka faa'iideysiga xiriirada jira ee la leeyahay Ururada Bulshada Ku saleysan (CBO-yada) ee u gaarka ah dhaqanka iyo bulshada iyo Qabiilada si macluumaad loola wadaago BIPOC, naafanimada, koox diineed oo laga tiro badan tahay, bulshooyinka LGBTQIA2S+ oo ku saabsan Khadka tooska ah ee Xirmada Ka Jawaabida Eexda si loo xaqiijiyo in ilo ku habboon la siiyo dhibanayaasha iyo dadka ka badbaada dembiyada iyo dhacdooyinka eexda. CBO-yada iyo Qabiilada iyo Hay'adaha Fulinta Sharciga (LE) waxay si ballaaran u wadaagi karaan macluumaadka la iskala soo xiriirayo, iyada oo haddii ay suurtagal tahay, bixiyaan meelaha dhanka internet-ka ee laga sii gelayo Khadka tooska ah.[3]
2. Khadka tooska ahi waa in uu sii wadaa u faa'iideynta dadaalada wacyigelinta iyo iskaashiga ee hadda jira ee lala leeyahay Waaxda Waxbarashada si loo xaqiijiyo in maamulayaasha dugsiyada iyo

[3] Xirmada ayaa la heli doonaa iyada oo ku qoran Isbaanish, Arabic, Tagalog, Simplified Chinese, Traditional Chinese, Korean, Vietnamese, Af-Ruushka, Soomaali Ukrainian, Pashto, Dari iyo Hindi bisha Luulyo 2023.

barayaasha ka warqabaan adeegyada uu bixiyo Khadka tooska ah. Waa in ay sii wadaan bixinta waxyaabo wata soo koobida adeegyada Khadka tooska ah iyo macluumaadka la iskala soo xiriirayo, oo sii wadaan dadaalada wax lagu soo bandhigayo oo kooxaha wada hadalku la yeelanayaan barayaasha si loo dhiso xiriiro la leeyahay oo daaha looga qaado xeelado si loo gaaro dhacdada eexda iyo dhibanayaasha dembiga eexda ee dadka yar yar. Qiimeynta waa in lagu dhisaa dhammaan istiraatijiyadaha la hirgeliyay.

3. Gobolku waa in uu diiradda saaraa dadaalada lagu abuurayo barnaamijka daaweynta oo gaar u ah eedaysanayaasha dembiga eexda iyada oo lala tashanayo DOJ, kuwaasi oo ay tahay in ay ku jiraan ansixinta barnaamij xilliyeedka iyo qiimeynta natiijada. Xiriirka caafimaadka dhimirka-dembiga eexda ee lagu soo jeediyay xukunka wax la isku xukamay 'sentencing judgments' waxay u badan tahay in yihiin ku been ah: dad badan oo qaba naafanimada caafimaadka dhimirku kuma lug yeeshaan falalka eexda-ku dhisan, iyada oo dad badan oo ku lug yeesha falalka eexda-ku dhisani aysan qabin xanuunada caafimaadka dhimirka.
4. Dhibanayaasha dembiga eexda waxa dhici karta in ay la kulmaan xasillooni darro bulsho iyo dhaqaale, PTSD, iyo aaminaad darrada nidaamka cadaaladda iyada oo sababtu tahay waayo-aragnimo hore oo xun, taasi oo saameysa rabitaankooda ah in ay la shaqeeyaan LE iyo xeer ilaaliyayaasha. Adeegyada dhibbanaha ayaa jira si ay u caawiyaan dhibbanayaasha oo u hagaan iyo la macaamilkooda LE iyo xeer ilaaliyayaasha,[4] kaasi oo dadka u dooda Khadka tooska ah ay hadda tixraacaan marka dib loo eegayo wax kala doorashada lala leeyahay soo wacayaasha. DOJ waa in ay soo raacisaa liiska hay'adahani boggeeda internet-ka–oo ay weheliyaan adeegyada u gaarka ah dhaqanka iyo luqadda–iyo waxyaabo ay si joogto ah ula wadaagaan hawl-wadaagayaashooda nidaamka cadaaladda.
5. Kiisaska aan salka lahayn iyo kiisaska aan la gudbin ayaa dhaca sababta oo ah goldaloolooyinka dhanka sharci dejinta ah, tusaale, in wax lagu sawirro 'graffiti' hantida dhibbane ah dabaqad aan la dhowrayn oo aan la dacwayn karin sida ku cad ORS 166.155, xataa haddii hadafku yahay in la cabsi geliyo bulsho weynta ka tirsan dabaqad la dhowro. Hagaajinta xeer-dejineed oo la soo jeediyay ayaa laga saaray Sharciga La Soo Jeediyay 3443; DOJ waxay sii wadaa dadaaladeeda ay soo koobayso goldaloodada jira. [5]

[4] Tusaale ahaan, NAACP, APANO, IRCO, DRO, Casa Latinos Unidos, Latino Network, Latino Community Association, Disability Equity Center, Muslimahs United, AYCO, NAYA, Filipino Bayanihan Center, ADL.
[5] Qaar ka mid ah goldaloolooyinka jiraa ma ha kuwo si fudud loo hagaajin karo, tusaale, doodaha hadalka ayaa la sameyn karaa iyada oo la eegayo qaylada cayda ee nacaybka ku dhisan ama warqadaha ololaha ee lagu beegsanayo dabaqadaha la dhowrayo.